



**COVID-19
VACCINE**
Public Health
Advice

Kadib Comirnaty kaada (Pfizer/ BioNTech) COVID-19 talaalka

Waad ku mahadsantahay sida aad ubadbaadisay naftaada iyo dadka kale adoo qaadnaya tallaalka. Hadda adigo qaatay tallaalkaada, waxaan ku waydiisanaynaa inaan aqriso dokumiintigan si taxadar leh, si aad u ogaato waxaad filankarto inaad dareento maalmaha soo socda iyo meeshaad ka heli karto macluumaad badan. Aqri warqadda yare macluumaadka tallaalka COVID-19 een ku siinay kuna saabsan tallaalka sidoo kale.

Waxaan kaloo ku siinaynaa diwaanka tallaalkaada maanta. **Fadlan ku xafid kaarka diwaanka meel amaan ah.**

Maxaa dhici kara maalmaha soo socda?

Dadka qaar kuwaasoo qaatay tallaalka aad maanta qaadatay adigu ayaa:

- Yeelan doona danqasho, barar iyo /ama guduudasho gacan meeshii ay ku mudeen tallaalka
- Dareen daal
- Madax xanuun yeelasho
- Murqo xanuun
- Kalagoys xanuun
- lallabo
- Qandho yeelasho(heerkul ah 38 degrees Celsius ama kasareeya).

Sida talaalyada kaloo dhan. Waxaad soo u gudbin karta waxyeeloyinka tuhunka leh Health Products Regulatory Authority (HPRA).

Si aad usoo gudbiso waxyeelada tallaalka COVID-19, fadlan booqo www.hpra.ie/report

Maxay haddan leeyahay qandho ama xanuun iyo xanuuno?

Hadaad leedahay qandho ama aad leedahay xanuuno, waa inaad qaadataa paracetamol ama ibuprofen inu ku caawiyo. Sikastaba ha ahaatee, haddii ay qandhadaadu ay sii joogto inkabandan 48 saacadood ama haddii aad weli ka walaacsantahay, fadlan raadso talo caafimaad. Ha qaadan ibuprofen haddaad uur tahay.

Miyaan ubaahnahay inaan sameeyo waxkasta intaan qaadan qiyaasta labaad ee tallaalka?

Markaad qaadanayso qiyaasta xigta iyo kama dambeysta tallaalka, fadlan usheeg kooxda tallaalka haddii ay jireen wax isbadal ah tariikhdaada caafimaadka.

Soonqaado kaarkaada diwaanka tallaalka markaad qaadanayso qiyaasta labaad.

Tani waxay noqon doontaa 28 maalmood gudahood (afar isbuuc).

Warka wanaagsan

Qaadashada tallaalka COVID-19 waa inay ka ilaalisaa dhibaatooyinka halista leh ee COVID-19.

Tallaalyadu waxay baraan habka difaaca jidhkaada inay kaa difaacaan cudurada. Way ka ammaan badan tahay habka difaaca jidhkaada inuu ku barto tallaalka halkuu ka qaadi lahaa COVID-19.

Weli waan baranaynaa

Waxay qaadanaysaa 7 beri kadib qaadashada qiyaasta labaad inuu shaqeeyo.

Waxaa jira fursad yar aad weli ku qaadi kartid COVID-19 xittaa haddii aad haysato tallaalka.

Ma ogin weli inaad qaadashada tallaalku kaa joojinayo ugudbinta fayraska dadka kale, markaa waa inaad sii wado la socoshada talooyinka caafimaadka ee dadweynaha:

- Raac hagaha kala fogaanshaha(ka fogow labo metre dadka kale meesha macquul ah)
- Xidho dabool waji
- Gacmahaaga dhaq si joogta ah.

Suaal miya haysaa?

Haddii aadan hubin wax uun, ama hayso suuqo uun ku saabsan tallaalka COVID-19, fadlan nasoo weydii hadda ama booqo [hse.ie/covid19vaccine](https://www.hse.ie/covid19vaccine) ama garaac HSELive on **1850 24 1850**.

Waxaa daabacday HSE Janaayo 14 keeda 2021.Nooca 3.



Rialtas na hÉireann
Government of Ireland